

La qabsiga xanaanooyinka Lillestrøm

Buug – yaraha macaluumaadka ee
loogu tala galay waalidiinta.



Hambalyo helitaanka booska xanaanada ee degmada Lillestrøm!

Bilaabidda xanaanada caruurta waa wakhti xiiso u leh , yar iyo weynba

Waalid ahaan, waxaa muhiim ah in la ogaado waxa laga filayo Xanaanada xilliga la qabsashadda, iyo wax ay tahay inuu waalidku sameeyo si uu ugu diyaariyo, bilow kalsooni iyo wanaag leh.

Buugan yarahan waxaa ku jira talooyin laagu talagalay waalidiinta iyo macaluumaad ku saabsan siday u shaqayso xanaanada caruurta xilliga bilowga



Qorshaha tayo, leh xilliga bilowga

Degmada Lillestrøm waxay leedahay qorshe tayo leh xilliga la qabsashadda, kaas oo u gaar ah xanaanooyinka degmooyinka. sidoo kalena waxaa heli kara xanaanooyinka gaar ka loo leeyahay.

Xanaanooyinka kala duwan ee dagmadu waxay samaynayaan la qabsasho ku haboon xilliga bilowga. Xanaano kasta waxay si gaar ah u siisa waalidiinta macaluumad toos ah, marka ay soo dhowaato bilowga xanaanadu.

Qorshaha tayadu wuxuu salka ku hayaa cilmi baaris ku saabsan xilliga la qabsashadda. waxaanu ku salaysan yahay aragti ka timid kelmada loo yaqaano Trygghets sirkelen (Circle of Security) iyo Jåttå-modellen. Waxaa lagu bixin doonaa macaluuma dheeri ah kulanka waalidiinta.



Bilowga xalaaladda la qabsashdda waxay waalidiintu heli doonaan arrimhan hoos ku xusan:

Kulan waalidiinta cusub loogu tala galay

- Macaluumaad ku saabsan xilliga lagu jiro laqabsashadda iyo argtida saldhiga u ah

Booqashada maalmo ka hor xilliga bilowga

- Xanaanadu waxay u diyaarisaa si ay waalindiinta iyo caruurtu u soo booqan karaan, xanaanadda iyo booska ay ku taalo, iyo shaqaalaha bilowga ka hor.

Wadahal ku saabsan xilliga la qabsashadda oo la yeelanaayo hogaamiyaha barbaarinta.

- Wadahal ka hor inta aan la bilaabin xanaanadda taas oo ay u jeedaddu tahay, si loo ogaado macaluumaad ku saabsan ilmah iyo qoyska, si loo fududeeyo sida ugu wanaagsan ee ilmuhu ula qabsan doono

Wadahadalka bilowga ah ee lala yeesho hogaamiyaha barbaarinta

- Wadahadal 2 -6 toddobaad ka dib xilliga bilowga u jeedaduna tahay, si loo wadaago khibradaha xilliga la qabsashadda iyo in la diyaariyo sidii loo sii wadi lahaa wada shaqaynta

Talooyin loogu talagalay waalidiinta si uu u wanaagsanaado bilowga la qabsashadda xanaanadda.

Xilliga bilowga xanaanadda, waalidiinta waa kuwa ugu mihiimsan taageeradda si ay u helaan caruurta kalsooni iyo wanaag. Caruurta waxay adduunka kula socodaan iyadoo akhriyaya falcelinta waalidka iyo luqadda jirka. Sidaa darteed, waxaa mihiim ah in waalidku gacan ka geysto sidii loo gaarsiin lahaa ilmaha in xanaanaddu tahay meel ammaan ah. oo lagu sugnaan karo, halkaas oo ay ku ciyaari karaan, sahamiyaan isla markaana la joogayaan dad waaweyn oo amaan ah.



Talooyin loogu talagalay waalidiinta

- Soo booqo goobta xananaddu kutaalo xilliga aanary furnayan.
- Hala qabsado ilmuhu cunta qadaashada, caagada biyaha lagu qaato iyo boorsada dhabarka la,saarto, ka hor intanu bilaabin xananadda.
- Waxaad sii bari kartaa wax ilmuhu laqabsado ama jeclaado sida kadaabad,, caruusad (boonbalq), bamse, iyo wixii la mid,ah, si ilmuhu u soo qaato wax uu yaqaano oo u jecelyahay.
- Ka qaybgal maamaha booqadda loo qorsheeyey.
- Ka qaybgal kulanka loogu talagalay waalidiinta cusub.



- Ugu talagal ugu yaraan 5 maalmood xilliga la qabsashadda bilowga xanaanadda.
- Fariin sii xanaanadda hadaad u baahantahay turjumaan.
- Markiiba hal waalid ayaa la joogi kara ilamah, xilliga la qabsashadda.
- Waxaad isku daydaa inuu ilmuhu helo xasilooni maalintii, ka hor inta aanu xanaadda iman.
- Ha helo ilmuhu xasilooni galabtii, xilliga la qabsashadda xanaanada.
- Ha ka gaabin inaad la soo xiriirto xanaanadda.



Somali